

Shuruudaha Tababarka iyo Jadwalka Dhamaystirka ee Bixiyeyaasha La Shaqeeya Carruurta Da'da Dugsiga

Fadlan u isticmaal dukumeentigan si aad u soo koobto shuruudaha shaqada ka hor iyo shuruudaha tababbarka ee dhammaan doorarka

Qoraalladaan Xusuusnow:

- Marka loo eego WAC 110-06, bixiyeyaasha da'da dugsiga waxaa looga baahan yahay inay maraan baaritaanka asalka ee ay sameeyso waaxdu.
- Marka loo eego qaybta 3 ee WAC 110-301-0105, dhammaan bixiyeyaasha da'da dugsiga, oo ay ku jiraan tabaruceyaasha, waa inay soo gudbiyaan dukumeenti uu saxeexay xirfadle daryeel caafimaad oo shati-ga (leysanka) leh 12 bilood ee la soo dhaafay, taasoo xaqiijinaysa baaritaanka ama daaweynta qaaxada (TB).
- Ka hor inta aan la siin shatiga leysan ama aan loo oggolaan inay la shaqeeyso carruurta iyadoo aan la ilaalin, dhammaan bixiyeyaasha waa inay dhammaystiraan nidaamka diiwaangelinta ee diiwaanka xoogga shaqaalaha elektaroonigga ah (MERIT) iyagoo booqanaya website-ka merit.dcyf.wa.gov.



Dulmarka Shuruudaha Tababarka:

- Dulmarka Shuruudaha Tababarka – WAC 110-301-0105 – <https://app.leg.wa.gov/wac/default.aspx?cite=110-301-0105>
- Shuruudaha Tababarka – WAC 110-301-0106 – <https://app.leg.wa.gov/wac/default.aspx?cite=110-301-0106>
- Tababarka Adeegga – WAC 110-301-0107 – <https://app.leg.wa.gov/wac/default.aspx?cite=110-301-0107>

Guudmarka Shuruudaha Tababarka

DOORKA	SHURUUDAHA TABABBARKA	SHURUUDAHA ADEEGA
Agaasimaha Barnaamijka Agaasimaha goobta	<ul style="list-style-type: none"> • Hanuuninta ku saabsan shatiga/leysan-ka (haddii ay khuseyso) • Aasaaska-Da'da Dugsiga* • Gargaarka degdega ah/CPR • Cudurada dhiiga ka dhasha • Oggolaanshaha Gacan-qablayaasha Cunnada (haddii ay khuseyso) 	Tababar Sannadeedka 10-saacadood ah ee Adeegga
Macallinka hormuudka ah	<ul style="list-style-type: none"> • Aasaaska-Da'da Dugsiga* • Gargaarka degdega ah/CPR • Cudurada dhiiga ka dhasha • Oggolaanshaha Gacan-qablayaasha Cunnada (haddii ay khuseyso) 	Tababar Sannadeedka 10-saacadood ah ee Adeegga

*Tababarka aasaasiga ah ee da'da-dugsiga waxa uu koobayaa mawduucyada lagu qeexay qaybaha 4-7 ee WAC 110-301-0106. Mawduucyadan waxaa ka mid ah Aqoonsiga iyo Ka warbixinta Xad-gudubka (qaybta 4), U Diyaargarowga Degdega ah (qaybta 5), U-Daryeelka Carruurta La Kulma Guri La'aanta (qaybta 6), iyo Maareynta Daawada (qaybta 7).



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

Guudmarka Shuruudaha Tababarka

DOORKA	SHURUUDAHA TABABBARKA	SHURUUDAHA ADEEGA
Kaalayaha Waxbarashada	<ul style="list-style-type: none"> Aasaaska-Da'da Dugsiga* Gargaarka degdega ah/CPR Cudurada dhiiga ka dhasha Oggolaanshaha Gacan-qablaha Cunnada (haddii ay khuseyso) 	Tababarka Adeegga Gudaha ee 10-saac ee Sannadlaha ah
Caawiye	<ul style="list-style-type: none"> Dugsiga Hoose-Da'da* Cudurada dhiiga Oggolaanshaha Gacan-qablaha Cunnada (haddii ay khuseyso) 	N/A
Iskaa wax u qabso	<ul style="list-style-type: none"> Cudurada dhiiga ka dhasha Tababbarka hurdada badbaadada leh waa mid ku waajib ah shakhsiyadka tabaruca ah ee barnaamijka waxbarashada hore. Tababarada caafimaadka iyo badbaadada waxa ka mid ah garashada iyo ka warbixinta xadgudubka, u diyaar garowga degdega ah, iyo u adeegida caruurta ay haysato guri la'aanta. 	N/A

*Tababarka aasaasiga ah ee da'da-dugsiga waxa uu koobayaa mawduucyada lagu qeexay qaybaha 4-7 ee WAC 110-301-0106. Mawduucyadan waxaa ka mid ah Aqoonsiga iyo Ka warbixinta Xad-gudubka (qaybta 4), U Diyaargarowga Degdega ah (qaybta 5), U-Daryeelka Carruurta La Kulma Guri La'aanta (qaybta 6), iyo Maareynta Daawada (qaybta 7).

Jadwalka Tababarka Dhamaystirka:

- Shuruudaha Adeegga Kahor - Wac 110-301-0105
- Shuruudaha Tababarka - Wac 110-301-0106

Jadwalka Dhamaystirka Tababarka

SHURUUDAHA	GOORMA AYAY TAHAY IN LA DHAMMAYSTIRO SHURUUDAHA TABABARKA?	SIDEE LOO DHAMMAYSTIRI KARAA SHURUUDAHA TABABARKA?
Jihaynta shatiga	<ul style="list-style-type: none"> Kahor intaadan maamulin barnaamijka. Tan waxa la dhammeeyaa hal mar. 	<ul style="list-style-type: none"> DCYF waxaa lagu bixiyaa online-ka. DCYF waxay ku bixisaa qof ahaan (in-person): https://dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/licensed-provider/school-age-providers
Aasaaska-Da'da Dugsiga*	<ul style="list-style-type: none"> Kahor inta'an shatiga la bixin. Kahor intaadan la shaqayn da'yarta aan la ilaalin. This is completed once. 	<ul style="list-style-type: none"> Dhameystir aasaaska da'da dugsiga oo leh tababare uu aqoonsan yahay gobolka. Buuxi ECED&107 Caafimaadka, Badbaadada, iyo Nafaqada (qayb ka mid ah Shahaadada Hore), taasoo buuxinaysa shuruudaha aasaasiga ah ee da'da dugsiga.
Cudurada dhiiga ka dhasha	<ul style="list-style-type: none"> Ka hor inta'an la siin shatiga. Kahor intaanad la shaqayn carruurta. Tan waxaa lagu fuliyaa si waafaqsan shuruudaha Waaxda Shaqada iyo Warshadaha. 	Ka hubi ururada maxaliga ah ee bixiya adeegan.

Shuruudaha Tababbarka Tababbarka: Tababarrada lagu sharraxay WAC 110-301-0106 qaybaha 4-7 waxay ku jiraan Aasaaska Da'da Dugsiga. Haddii tabarucehu aanu dhammayn aasaaska da'da dugsiga (taas oo aan lagama maarmaan u ahayn tabaruceyaasha), waxay ku dhammayn karaan tababaradan sidii tababaro gooni-gooni ah oo bilaash ah DCYF online.

*Haddii aad hore u shaqaynaysay wakhtiga xeerkan dhaqan galayo, waa inaad ku dhammaystiraa aasaaska da'da dugsiga saddex bilood gudahooda laga bilaabo taariikhda ay qaybtani hirgasho. Dhammaan shaqaalaha cusubi waa inay dhammaystireen aasaaska da'da dugsiga ka hor intaysan la shaqayn carruurta keligood.

Jadwalka Dhamaystirka Tababarka

SHURUUDAHA	GOORMA AYAY TAHAY IN LA DHAMMAYSTIRO SHURUUDAHA TABABARKA?	SIDEE LOO DHAMMAYSTIRI KARAA SHURUUDAHA TABABARKA?
Gargaarka degdega ah/CPR	<ul style="list-style-type: none"> Ka hor inta aanad la shaqayn carruurta iyada oo aan la ilaalinayn. Waaxda Shaqada iyo Warshadaha ayaa u baahan in tan la dhammaystiro. 	La xidhiidh ururada maxaliga ah ee bixiya adeegan.
Ogolaanshaha Gacan-ku-hayayaasha Cunnada	<ul style="list-style-type: none"> Kahor intaadan diyaarin ama bixinin cuntada carruurta. Tani waxay ku dhammaatay sidii waxaa u baahan waaxda caafimaadka deegaankaaga. 	Waaxda caafimaadka deegaankaaga.

Shuruudaha Tababarka Tababarka: Tababarrada lagu sharraxay WAC 110-301-0106 qaybaha 4-7 waxay ku jiraan Aasaaska Da'da Dugsiga. Haddii tabarucehu aanu dhammayn aasaaska da'da dugsiga (taas oo aan lagama maarmaan u ahayn tabaruceyaasha), waxay ku dhammayn karaan tababaradan sidii tababaro gooni-gooni ah oo bilaash ah DCYF online.

**Haddii aad hore u shaqaynaysay wakhtiga xeerkani dhaqan galayo, waa inaad ku dhammaysataa aasaaska da'da dugsiga saddex bilood gudahooda laga bilaabo taariikhda ay qaybtani hirgasho. Dhammaan shaqaalaha cusubi waa inay dhammaystireen aasaaska da'da dugsiga ka hor intaysan la shaqayn carruurta keligood.*

Shuruudaha Tababarka Shaqada:

WAC 110-301-0107

Qoraalladan Xusuusnow:

- Tababarka sanadlaha ah ee adeega bixiyayaasha da'da dugsiga waa 10 saacadood.
- Ka dib 12 bilood oo shaqo isku dar ah, adeegga gudaha waa lagama maarmaan.
- Sannadka kalandarka DCYF (Janaayo 1 - Diseembar 31) waxa loo isticmaalaa in lagu xisaabiyo baahida tababarka sannadlaha ah.
- Shan saacadood oo tababar shaqo ah ayaa laga yaabaa in la sii wado sannad maaliyadeedka ilaa kan xiga.
- “Saacadaha STARS” ama “tababarka gobolku ansixiyay” waa ereyo kale oo si weyn loo isticmaalo si loogu qeexo “adeegga dhexdiisa.”

Shuruudaha Tababarka Adeegga

SHURUUDAHA ADEEGGA	GOORMA AY UGU DAMBAYSAY DHAMAYSIDKA SHURUUDAHA TABABARKA?	SIDEE AY U BAAHAN YAHAY SHURUUDAHA TABABARKA?
Tababarka Adeegga	<p>Kadib dhamaystirka Aasaaska Da'da Dugsiga:</p> <ul style="list-style-type: none"> Sannad kasta (laga bilaabo Janaayo 1 ilaa Diseembar 31), 10 saacadood oo tababar shaqo ah ayaa la qabtaa. Saddexdii sanaba hal mar, barmaamijyada iyo agaasimayaasha goobtu waa inay dhammaystiraan 10 saacadood oo ah Tababarada Hogaaminta*. 	<ul style="list-style-type: none"> Tababarka gobolku ansixiyay. Tababarada kale waa in ay la socdaan Awoodaha Muhiimka ah ee Gobolka Washington. Shaqada koorsada kulliyadda ee u dhiganta Xirfadaha Muhiimka ah ee Gobolka WA.

**Tababarka Dhaqanka Hogaamintu waxa uu koobayaa Awoodaha Muhiimka ah ee Gobolka Washington ee qorshaynta iyo horumarinta barnaamijka, horumarinta xirfada, iyo hogaaminta.*

DCYF ma takoorto waxayna usiisaa helitaan siman barnaamijyadeeda iyo adeegyadeeda, dhamaan dadka iyadoon loo tixgalin isirka, midabka, jinsiga, diinta, caqiidada, xaalada guur, dhalashada, rabitaanka galmo, da'da, xaalad ciidan ama jiritaanka naafo jidheed, dareen ama maskaxeed.

Haddii aad rabto nuqullo dukumeenti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan kala xidhiidh DCYF Constituent Relations (Xidhiidhada Qaybaha) 1-800-723-4831 ama iimaylka communications@dcyf.wa.gov.

DCYF PUBLICATION EL_0073SM (03-2024)